# Deeqda Joogtaynta Daryeelka Ilmaha Tilmaamaha Kharashaadka iyo Duwaanada

## Guudmar

Tilmaamahan waxaa lagu eegayaa qaybaha kharashaadka kala duwan ee la ogol yahay Deeqda Joogtaynta Daryeelka (Child Care Stabilization Grant) Ilmaha oo waxay bixiyaan muunada qayb kasta oo iibka la ogol yahay ah. Waxa ay sidoo kale bixiyaan tusaalayaasha qaabab kala duwan oo aad u duwaan gelin karto kharashaadkaaga. Waxa aad isticmaali kartaa agabkan qaaba aad uga hesho fikiro sida aad u kharash garanayso lacagta deeqdaada.

### Xadiga Barnaamijka iyo Xadiga Lagu Daray

Waxaa jira dhawr qaybood oo kharashka la ogol yahay ah oo xadiga barnaamijka ah iyo xadiga lagu daray ee Deeqda Joogtaynta. Waxa aanu eegi doonaa qayb kasta, waxaanu bixin doonaa tusaalayaasha kharaska oo waxaanu bixin doonaa khidado kala duwan oo lagu duwaan gelinayo kharashaadka. Fadlan ku xisaabtan in aanu liisku wada dhamaystiraynin dhamaan qaababka la ogol yahay ee deeqda loo isticmaali karo.

| | | |
|---|---|---|
| Musharka/Gunooyinka, Korodhka Heerka Shaqaalaha | Ka Tanaasulka Kharashka La Wada Bixiyo ama Kharashka Waxbarashada | Kirada ama Daynta Guriga, Kharashaadka Shaqada, Adeegyada, iyo Dayactirka |
| Taagrada Caafimaadka Maskaxda | Cuntada, Caafimaadka, iyo Hawlaha Nafaqada | Ka Jawaabida Tobobarka Caafimaadka iyo Amaanka iyo COVID-19 |

### Musharka/Gunooyinka, Korodhka Heerka Shaqaalaha

Qaybtan waxaa lagu bixiyaa kharashaadka la xidhiidha lacagaha iyo gunooyinka dadka ka shaqeeya barnaamijka.

**Waa kuwan waxoogaa tusaalayaal ah oo kharashaadkan ah:**

- Mushaharkaaga
- Mushaharka shaqaalahaaga
- Gunooyinka sida caymiska caafimaadka, daawaynta ilkaha, iyo indhaha ee naftaada ama shaqaalahaaga
- Mushaharka wakhtiga fasaxa
- Kharashaadka hawlgabka iyo kaalada

**Sidee ayaad u duwaan gelinaysaa kharashaadkan?**

- Duwaanaha mushaharka iyo gunada ee warbixinta mushaharka ama duwaanka mushaharka
- Xaadiriska shaqaalaha iyo waraaqaha mushaharka
- Warbixinta mushaharka Waaxda Amaanka Shaqaalaha (Employment Security Department, ESD) ama warbixinta mushaharka Adeega Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Service, IRS) ee shaqaale kasta
- Bayaanka bangiga
    - Jeegaga bangigu fasaxay
- Waraaqaha gunooyinka kale ee la siiyay xubnaha shaqaalaha daryeelka sida bayaanka caymiska ama bayaanka gudista kharashka

## Caymis Wadareedka ama Ka Tanaasuliada Kharaska

Daryeel bixiyayaasha ilmaha waxay sidoo kale u isticmaali karaan lacagta deeqda inay siiyaan waxyaabo kale qoyska ku jira barnamijkooda oo ay ku adag tahay inay iska bixiyaan kharashka.

**Waa kuwan waxoogaa tusaalayaal ah oo kharashaadkan ah:**

- Bixinta kharashka arjiga
- Lacagta bisha ee daryeelka ilmaha si markaa ayna qoysku u bixin

**Sidee ayaad u duwaan gelinaysaa kharashaadkan?**

- Haynta duwaanka lacagta aad ka qaadatay qoysaska ee daryeelka ilmaha aad bixisay sanad kadib marka aad deeqda qaadato. Hadii aad siiso kaalmo kharash ka dhaaf qoysaska ku jira, waxa aad duwaan gelisaa dhamaan kharashaadka ama kharashka aad ka qaadi jirtay ee aad u isticmaashay deeqda adiga oo qoyska matalaya.
- Waxa aad samayn kartaa fool qoysasku buuxinayaan si ay u muujiso in kharashkooduu ama inta ay bixinayeen aad ka dhaaftay oo aad ku bixisay deeqda lacagta.

## Kirada ama Daynta Guriga, Kharashaadka Shaqada, Adeegyada, iyo Dayactirka

Waxa aad u isticmaali kartaa deeqda si aad ugu bixiso wixii kharash ah ee aad ka bixiso meesha uu barnaamijkaagu ku shaqeeyo. Waxay noqon kartaa kharashkaad la xidhiidha kirada ama daynta guriga, dayactirka ama waxyaabaha yaryar ee hormarinta ah ee xarunta, iyo adeegyada u sahlaya in barnaamijku uu furnaado.

**Waa kuwan waxoogaa tusaalayaal ah oo kharashaadkan ah:**

- Lacagta kirada, daynta guriga ama kirooyinka

- Kharashka adeegyada (kulayliyaha, biyaha, laydhka, internetka, taleefanka, adeega qashinka, iwm.)
- Caymiska ganacsiga
- Alaabaadka iyo adeegyada loo baahan yahay in ganacsigu uu socdo, sida:
    - Sooftiweerka Mushaharka ama Balansiga
    - Tobobarka iyo adeegyada taageerada waxyaabaha fududeeyaya shaqada (sida, nidaamyada maamulka ee daryeelka ilmaha)
    - Alaabaadka xafaayadaha iyo suuliga
    - Alaabaadka hurdada amaanka ah
    - Alaabaadka lagu ciyaaro ee waxna lagu barto
- Dayactirka xarunta ama hormarinta fudud sida:
    - Hagaajinta suuliga
    - Ku xidhitaanka rako, gacmo, iyo waxyaabo kale
    - Ku xidhitaanka gidaar culays badan lahayn si loo abuuro meelo faro badan oo lagu kala fogaado
    - Ku badalka rooga linoleum ama waxyaabo kale oo dushooda la nadiifin karo
    - Ku rakibaada qasabada ama iswiijyada laydhadhka ee in la taabto aan loo baahnayn

---

***Xasuuso:***

*Deeqda looma adeegsan karo dhismaha wayn ama dayactirka xarunta ee wayn, waxka badalka, ama wax ku darida taas oo u baahan ruqsad dhisme. Wixii dhisme wayna ama habaynta xarunta ee aan u baahnayn ruqsada looma baahna.*

---

**Sidee ayaad u duwaan gelinaysaa kharashaadkan?**

- Bayaanka kharashka daynta guriga/kirada/meesha
- Bayaanka adeega
- Qaansheegaha la bixiyay iyo/ama risiidhada iibka ee alaabaadka iyo agabka

## Taageerada Caafimaadka Maskaxda ee Caruurta iyo Shaqaalaha Daryeelka Ilmaha

Deeqda waxaa loo isticmaali karaa kharashaadka la xidhiidha caafimaadka maskaxada iyo badqabka caruurta iyo shaqaalaha.

**Waa kuwan waxoogaa tusaalayaal ah oo kharashaadkan ah:**

- Latalinta caafimaadka maskaxda ee adiga ama shaqaalahaaga
- Latalinta caafimadka maskaxda ee caruurta aad hayso
- Iibsiga app-ka taleefanka ee caafimaadka maskaxda ee adiga ama shaqaalahaaga

**Sidee ayaad u duwaan gelinaysaa kharashaadkan?**

- Risiidhada ama qaansheegaha la bixiyay ee lagu iibsaday

## Cuntada, Caafimaadka, iyo Hawlaha Nafaqada

Waxa aad u isticmaali kartaa deeqda inaad ku xoojiso nidaamka hawlaha cuntada iyo jidh ahaan ee caafimaadka qaba ee barnaamijkaaga.

**Waa kuwan waxoogaa tusaalayaal ah oo kharashaadkan ah:**

- Adeegyada cuntada iyo cabitaanka ee cuntooyinka uu bixiyo barnaamijkaagu
- Qaybaha cuntada fudud iyo cuntooyinka ee caruurta ku jira daryeelkaaga
- Iibsiga agabka iyo alaabaadka kaa caawinaya inaad bixiso cunto iyo cunto fudud oo nafaqo leh. Waxaa kuwaas kamid ah:
  - Agabka - talaagad, qaboojiye, qaanada wax lagu diiriyo, oofen, shoolad, iyo dhari
  - Xidhmada wax ku cunaan caruurta oo le'eg oo wadata bilaydho, malqaacado iyo farageetooyin, iyo agabka lagu cabiyo inta uu ilmuhu cunayo
  - Agabka lagu diyaariyo cuntada darayga ah - jalxada, distida, maktafiyaha, waraaqaha wax lagu dubo
- Agabka fasalka (sida, buugaagta iyo manhajka) iyo agabka lagu bixiyo jimicsiga jidhka (sida, agabka lagu ciyaaro, alaabaadka banaanka lagu ciyaaro)
- Tobobarka la xidhiidha nidaamka nafaqada, amaanka cuntada, iyo ka shaqaynta
- Tobobarka hawlaha jidhka iyo deegaanka waxbarashada banaanka
- Hormarinta xarunta ee la xidhiidha naasnuujinta hooyada iyo shaqaalaha

**Sidee ayaad u duwaan gelinaysaa kharashaadkan?**

- Risiidhada ama qaansheegaha la bixiyay ee lagu iibsaday

## Tobobarka Caafimaadka iyo Amaanka iyo Agabka iyo Qalabka COVID-19

Barnaamijyadu waxay isticmaali karaan deeqda iibka, dib u habaynta, ama agab la cusboonaysiiyay oo loo adeegsado si looga jawaabo COVID-19, iyo sidoo kale in lagu tobobaro shaqaalaha talaabooyinka caafimaadka iyo amaanka.

**Waa kuwan waxoogaa tusaalayaal ah oo kharashaadkan ah:**

- Agabka ilaalinta shakhsi ahaaneed (golofis, wajigashad, heerkul beeg, iwm.)
- Helitaanka talaalka COVID-19 (balamaha, fasaxa mushaharka leh, gaadiidka, iwm.)
- Agabka nadiifinta iyo jeermis dilka iyo adeegyada (masaxaada nadiifinta/jeermis dilka, nidaamka hawada saara, faakuyuumka, qasaalad/qalajiye, jaafeel, gacmaha jeermis ka dilaha, adeegyada nadiifinta xirfadlaha iyo jeermis ka dilka, iwm.)
- Tobobarka iyo hormarka xirfada ee nidaamka caafimaadka iyo amaanka, iyo hormarka xirfadeed ee lagu buuxinayo tilmaamaha caafimaadka iyo amaanka gobolka iyo deegaanka
- Agabka iyo qalabka fasalka ee lagu xoojiyo hawlaha jidheed (buugta iyo manhajka, alaabaadka lagu ciyaaro, alaabaadka banaanka lagu ciyaaro)
- Agabka iyo qalabka gudaha iyo banaanka (kuraasta la qaato, bacda la xidho, meelaha lagu farxasho, agabka iyo waxa wax lagu cuno ee marka kaliya la isticmaalo, calaamadaha COVID-19, iwm.)

**Sidee ayaad u duwaan gelinaysaa kharashaadkan?**

- Risiidhada ama qaansheegaha la bixiyay ee lagu iibsaday
- Qaansheegaha la bixiyaya, risiidhada, iyo jeegaga lala baxay macluumaadkooda ee tobobarka/duwaan gelinta hormarka xirfadeed
- Xaadiriska shaqaalaha

## Xadiga Shaqaalaha: Hawlaha Dalacsiinta, Shaqaalaysiinta iyo Sii Haysashada Shaqaalaha

Xadiga shaqaalaha waa in la isticmaalaa si loo kordhiyo mushaharaadka iyo gunooyinka, iyo wixii hawlaha shaqaalaysiinta iyo haynta ah. Tani waa inay ka badan tahay mushaharka iyo gunooyinka caadiga ah.

**Tusaale ahaan waxaa kamid ah kharashaadka:**

- Lacagta gunooyinka ama bakhshiishka ee shaqaalaha (naftaada, hadii aad tahay mulkiile/hawlwadeen guri qoys oo liisan haysta oo aan lahayn shaqaale kale)
- Gunada qaadashada shaqaalaha cusub
- Kharashka daryeelka caafimaadka shaqaalaha ama wixii loo hormariyo sanadkii ee laga goosto
- Kordhinta mushaharka

**Sidee ayaad u duwaan gelinaysaa kharashaadkan?**

- Duwaanada mushaharka iyo gunooyinka ee warbixinta mushaharka (warbixintan waa in sidoo kale lagula socdaa gunooyinka ama korodhka bakhshiishka)
- Waraaqaha shaqaalaysiinta, foomamka kaydka tooska ah, wadarta saacadaha la shaqeeyay, xadiga shaqaalaha la siiyo, cashuurta laga jaro, iwm. Hadii aad isticmaasho mushaharka shirkad, waxa aad ku dari kartaa macluumaadkan warbixinta mushaharka ee cadiga ah
- Xaadiriska shaqaalaha
- Warbixinta mushaharka ESD ama warbixinta mushaharka IRS ee shaqaale kasta
- Bayaanka bangiga

---

***Xasuuso:***

*In la hayo dhamaan kharaska ayaa aad u muhiim ah. Hadii laguu soo xusho dadka Laga Uruurinayo Risiidhada iyo Xaqiijinta, waxa aad u baahan tahay nuqulo u dirto DCYF oo dhamaan risiidhada ah iyo waraaqaha sida aad u bixisay ah lacagta lagu siiyay. Hadii aanad soo dirin risiidhada iyo waraaqaha muujinaya in deeqda loo adeegsaday sida la ogol yahay, waxaa dhici karta inaad gudo qayb ama dhamaan deeqda aad ka heshey Gobolka Wadhington.*

---